Video 19

SNTV: February 23, 2020

https://www.youtube.com/watch?v=0rWHoHCs-PE

The Speaker of the Hirshabelle Parliament sends an appeal to the people of Ceel Cali

In Arabic: *"In the name of Allah, the Most Gracious, the Most Merciful. All praise is due to Allah, Lord of the worlds. Peace and blessings be upon the noblest of messengers, our prophet Muhammad, and upon his family and companions altogether." (1)*

First, I would like to thank SNTV for the work they are doing. I also thank the federal-level Members of Parliament present here—MP Maryan and MP Jeesow.

Our message concerns the recent problems caused by violent elements (Al-Shabaab) in the state of Hirshabelle, particularly in the Hiiraan region, in the district of Ceel Cali. In recent days, rocks have been collected and looted from that area.

As you know, violent groups in Somalia and globally have gone through different phases, harming people in various ways: looting livestock, abducting civilians, and committing many other atrocities. When they exhausted these, they have now begun exporting Somalia's natural resources abroad. They are doing so with the help of foreigners they have brought in who are skilled in exploration of minerals and how to use equipment used to survey and extract them. This activity has increased recently.

Tragically, civilians in the area have suffered. Some people have been killed. Others have been injured. There is significant unrest in the area. As the state of Hirshabelle, we have made substantial efforts. Roads have been closed, and security forces have carried out numerous operations [to stop transportation of these resources]. The resource in question has escaped us. However, I sincerely thank the security forces of the Federal Government of Somalia, who confiscated it, for acting swiftly after we informed them of the matter. I also extend my appreciation to the President of the Republic of Somalia, the Prime Minister, the Council of Ministers, and everyone in the Federal Government who contributed to addressing this issue.

Let me summarize a few key points.

First, I call upon the people of Hirshabelle who live in the area where these stones were stolen from to defend themselves, to defend their people and their land, and to protect it from international terrorists. Those groups will leave but you will stay. The land belongs to you. I say: defend your land. The Hirshabelle State government and the Federal Government of Somalia stand with you.

Second, I send a warning to those assisting international terrorists in exploiting the country's resources: they must desist. Otherwise, they will be brought before justice in a court of law and the same laws that apply to Al Shabaab will apply to them as well. That is my message to them. Al-Shabaab is a terrorist organization that is illegally present in the country, shedding the blood of the Somali people. Dealing with them is a crime.

Additionally, people have heard the word “rock.” This is not an ordinary rock, as some might assume. It is of great value. There are many such rocks and abundant natural resources in the country, particularly in the Hiiraan region, Ceel Cali district. This is not an ordinary rock. It contains significant minerals and is part of Somalia’s national wealth.

We thank the Federal Government of Somalia again and again for the actions taken. We intend to engage with the Federal Government regarding this resource, which belongs to the state and the local community, and ensure that it is handled according to the national natural resource laws previously agreed upon. We are ready, on behalf of both the Federal Government and Hirshabelle, to negotiate on how to prevent more rocks from coming here and how this resource will be managed going forward.

We also request the Federal Government to assist us in liberating the districts where Al-Shabaab is preparing to exploit resources.

Thank you very much. Once again, I thank the President of the Republic, the Prime Minister, the security forces, and the Council of Ministers. We hope to continue working together, God willing, to free the country from violent elements. Thank you. Anyone who assists Al-Shabaab is no different from Al-Shabaab.

Thank you.”

Feb 23, 2020

https://www.youtube.com/watch?v=0rWHoHCs-PE

Guddoomiyaha Baarlamaanka Hirshabelle oo dadka Ceel Cali baaq u diray.

“Bismillaahi Al-Raxmaani Al-Raxiim

Al-xamdu Lillaahi Rabbi Al-caalamiin

Wa salaatu wa salaamu calaa ashrafi al-murasaliin

Sayidinaa Muxammadin wa calaa aalihi wasaxbihi ajmaciin

Ammaa bacdu”;

Marka hore, waxaan u mahad celinayaa SNTV. Iyo, shaqada ay hayaan ayaan uga mahad celinayaa. Sidoo kale waxaan u mahad celinayaa xildhibaannada heer federal ee jooga, Xildhibaan Maryan iyo Xildhibaan Jeesow, iyagana waan u mahad celinayaa.

Warkeenna maanta wuxuu ku saabsan yahay maalmahan dhibaatooyin ay ka wadeen nabad-diidka (al Shabaab) state-ka Hirshabelle, gaar ahaan gobolka Hiiraan, degmada Ceel Cali. Yacni, dhagac ama dhagxaan, muxuu ahaayeey, maalmahaan laga soo guraayay meeshaasi, ama laga bililiqaysanaayay.

Waxaad ogtihiin, nabad-diidka Soomaaliya ama caalamka in ay hadba heer soo mareen. Ay dadka, yacni marba heer ku dhibaataynayeen. Sida in dadka xoolahoodii noolaa la boobo. In dad la afduubto. Dhibaato badan in ay u geysanaayeen. Tii markay soo yaraatay, hadda waxay bilaabeen in ay iib geeyaan resources kii ama khayraadkii dalka Soomaaliya in ay dibadaha u iib geeyaan iyaga oo kaashanaya ajnabi ay iyagu la yimideen oo yaqaanna, muxuu ahaayeey, macaadinta iyo qalabkaas qaabka loo baaro yaqaanna ayay, yacni, adeegsanayaan, markaas, ayaa hadda maalmahan soo korotay. Runtii, dadkii shacabka Ahaana dhibaato ayaa ka soo gaartay degaankaasi. Dad baa ku dhintay. Dad baa ku dhaawacmay. Meeshii waxaa ka taagan buuq fara badan. Annaga Hirshabelle ahaan, runtii dadaal fara badan ayaan samaynay. Waddooyinkii waa la xiray. Ciidammadu hawlgallo farabadan ayay qaadeen. Resource-kii, marka, runtii waa soo baxsaday. Waxaan u mahad celinayaa, oo gacanta ku dhigay, ciidammada ammaanka ee dowladda Soomaaliya, runtii, oo aan arrintaas la socodsiinay, iyaguna si wanaagsan u hawlgalay, ayaan runtii u mahad celinayaa. Oo uu ugu horreeyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, Ra’iisul Wasaaraha, iyo dhammaan golaha wasiirrada iyo cid kasta oo arrintaasi gacan ka geysatay ee Dowladda Federalka Soomaaliya.

Marka, waxaan rabaa in aan dhowr qodob ku soo koobo. Marka koowaad, waxaan ugu baaqayaa shacabka reer Hirshabelle ee deggan degaankaasi laga soo qaaday dhagxaantaasi, in ay is difaacaan. In ay dadkooda iyo dalkooda difaacaan. In ay argagixisada caalamiga ah ka difaacaan.

Dadkaas way tagayaan. Dalka adinkaa iska leh. Waxaan leeyahay dalkiinna difaacda. State-ka iyo dowladda Hirshabelle – na way idin garab taagan tahay iyo dowladda Soomaaliya.

Waxaan kalooo aan rabaa in aan halkaan baaq uga diro dadka ku hawlan caawinta argagixisada caalamiga ah ee khayraadkii ama resource-kii dalka ku caawinaya iyaguna in ay ka waantoobaan. Haddii kale waxaa la hor keeni doonaa, caddaladdaa la hor keeni doonaa, ama sharciga Shabaab qabanaaya ayaa qaban doona. Iyagana intaasaan u dirayaa.

Shabaab waa urur argagixiso ah oo dalka ku jooga sharci darro, dhiigga ummadda Soomaaliyeed daadinaya. Marka, in lala macaamilo runtii waa wax dembi ah.

Sidoo kale, waxaan rabnaa, dadka waxay maqleen dhagax. Dhagaxan ma ahan dhagax iska caadi ah- dadka in ay u qaataan ayaa laga yaabaa- waa dhagax ku fadhiya qiimo badan. Waa dhagxaan fara badan iyo khayraad fara badan ayaa dalka yaalla, gaar ahaan gobolka Hiiraan, degmada Ceel Cali. Marka, dhagaxaas dhagax caadi ah ma ahan. Wax fara badan ayuu ka kooban yahay ama macaadintaas ama khayraadka kale ee dalka ayuu ka mid yahay.

Marka dowladda Soomaaliya waan u mahad celinaynaa mar labaad iyo mar saddexaad qabashada ay qabteen. Waxaan doonaynaa marka, dhagaxaasi in aan dowladda Soomaaliya kala xaajoono-resource-kaas uu state-kaas iska leeyahay iyo degaankaasi in la mariyo sharciga khayraadka dalka u yaalla ee horay loogu heshiiyay. Annagana waxaan diyaar u nahay, annagoo ku hadlayna magaca Dowladda Federalka iyo kan Hirshabelle, inaan kala macaamilno sidii wax kale aan halkan loo keeni lahayn, iyo kan sidii loo maarayn lahaa in aan ka wada xaajoono.

Waxaan kaloo dowladda Soomaaliya ka codsanaynaa in ay naga gacan siiyaan xoreynta degmooyinkaasi Shabaabku hadda ay u soo diyaar garoobeen in ay khayraadkiisii qaataan. Aad iyo aad baad u mahadsan tihiin. Mar labaad iyo mar saddexaad waxaan u mahad celinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda iyo Ra’iisul Wasaaraha iyo ciidammada ammaanka iyo Golaha Wasiirrada. Waxaan idinka rajaynaynaa in aan wada shaqayn doonno insha Allah, dalkana nabad diidka laga xoreyn doono. Aad baad u mahadsan tihiin. Cid kasta oo nabad diidka Shabaab gacan siisana waxay la mid tahay Shabaab. Waad mahadsan tihiin.